# Siyaasada Jagada: Kharashka iyo Aruurinta #1229

| | |
|---|---|
| Waaxda: Patient Financial Services | |
| Cida loogu talagalay: General | Taariikhdii Ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay/Dib loo eegay: |
| Qaybta: Patient Care | Nooca: [RidgeviewClassification] |
| Khuseeya laakiin aan ku koobneyn: Revenue & Network Management | |
| Goobta: All Locations | |

: **26 CFR § 1.501 (r) -6**

**UJEEDADA:**

Ujeedada Siyaasadaan Lacag bixinta iyo Soo uruurinta waa in lagu qeexo habka Ridgeview ee lagu helo lacag bixinta daryeelka la siiyo bukaanka. Haddii ay dhacdo lacag bixin la'aan, Ridgeview waxaa ka go'an in ay samayso dadaalo macquul ah si ay u go'aamiso in bukaanku u qalmo caawimaada dhaqaale kahor inta uusan billaabin ficilada uruurinta. Waa muhiim in dhammaan bukaanadu fahmaan siyaasadaan iyo dheefahooda caymiska. Bukaanadu waxay la xariiri karaan 952-442-8054 ama 866-286-9840 haddii ay qabaan wax su'aalo ah ama walaacyo ah.

**SIYAASADA:**

Ridgeview waxay qayb ka tahay inta badan qorshayaasha caymiska, oo ay kujirto Medicare. Haddii bukaanku uu ku jiro caymis ay Ridgeview la sameyso ganacsi laakiin uusan haysan kaarka caymiska ee ugu dambeeyay, waxa laga yaabaa in lacag bixinta looga baahdo ilaa caymiska laga xaqiijinayo. Oggaanshaha xaalada dheefaha caymiska iyo shabakada waa waajibaad saaran bukaanka. Bukaanada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xariiraan shirkada caymiska haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo la xariira caymiskooda.

Haddii bukaanku uusan ku jirin caymis ay Ridgeview ganacsi la sameyso uuna go'aansado inuu isticmaalo adeegyadeeda, waxaa la bixiyaa in lacagta bixinta la sameeyo waqtiga adeegga la bixinaayo. Haddii bukaanku uusan ka tirsaneyn shirkad caymis, waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan caymis ayagoo u maraaya MNSure.org. Haddii dhammaan dookhyada caymiska ay dhammaadeen ayadoo uusan bukaanku ku guuleysan, bukaanka waxa laga yaabaa inuu u qalmo barnaamijka Daryeelka (Samafalka) Bulshada ee Ridgeview, eeg **Siyaasada Kaalmada Dhaqaalaha - #1225** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Bukaanadu waxay heli karaan codsiga Daryeelka Bulshada (Samafalka) kadib marka ay wacaan 952-442-8054 ama 866-286-9840, ayagoo codsiga kasoo degsanaya barta ridgeviewmedical.org, ama si toos ah u tagaya 500 S. Maple Street, Waconia, MN 55387.

A. **Qayb-Bixinta lacagta iyo Lacagaha la jaro:** Dhammaan qayb bixinada lacagaha iyo lacagaha la jaro waa in la bixiyo xiliga adeegga la bixinaayo. Heshiiskaan waa qayb kamid ah heshiiska lala galo shirkada caymiska bukaanka.

B. **Adeegyada aan Kharashkooda la Daboolin:** Qaar kamid ah - iyo guud ahaanba – adeegyada la bixiyay waxay noqon karaan kuwo aan kharashkooda la daboolin ama aan loo arkin inay caafimaad ahaan muhiim yihiin sida ay qabto Medicare ama caymis bixiyaasha kale. Guud ahaan waxaa laga yaabaa in bukaanadu masuul ka noqdaan adeegyadaan. Bukaanadu waxay codsan karaan qiimo dhimis la xariirta adeegyada aan qiimahooda la dabookin ayagoo isticmaalaya barnaamijka Daryeelka Bulshada (Samafalka).

C. **Caddeynta Caymiska:** Ridgeview waa inay hesho nuqulka aqoonsiga sawirka bukaanka iyo caymis hadda shaqeeya si ay u bixiyaan caddeynta caymiska iyo aqoonsiga. Haddii macluumaadka saxda ah ee caymiska aan la bixin waqti ku habboon, waxaa laga yaabaa in bukaanku masuul ka noqdo lacagta haraadiga ah ee hartay. Marka caymiska aan la garaneyn ama uusan bukaanku u qalmin, Ridgeview waxay qiimeyn ku sameyn doontaa u qalmida bukaanka ayadoo la raacaayo Sharciga Minnesota 144.587.



Aan la Xakameyn

D. **Xaalada Shabakada:** Bukaanku wuxuu masuul ka yahay oggaanshaha in Ridgeview ay katirsan yahay shabakada ayagoo u maraaya shirkadooda caymiska.

E. **Codsiyada Gudbinta"** Ridgeview waxay gudbin doontaa codsiyada ayadoo masuul ka ah bukaanada waxaana u caawin doonaa qaab kasta oo macquul ah oo aan awoodno si aan oga caawino helida lacagta bukaanku dalbaday. Shirkada caymiska bukaanka waxaa laga yaabaa inay bukaanka oga baahato inuu si toos ah usoo gudbiyo qaar kamid ah macluumaadka. Waa masuuliyad saaran bukaanka inuu u hogaansamo codsigooda. Haraadiga lacagta bukaanku dalbaday waa masuuliyad saaran haddii ay bixiso ama aysan bixin shirkada caymiska. Dheefta caymiska bukaanka waa heshiis u dhaxeeya bukaanka iyo shirkadiisa caymiska. Ridgeview kama qaybqaadato xiriirkaas**.**

F. **Lacagta La daboolo:** Haddii caymisku bukaanku uu isbadelo, Ridgeview waa in la ogeysiiyaa kahor booqashada xigta ee bukaanka si aan u samayno isbadelada ku habboon aana uga caawino bukaanka inuu helo dheefaha ugu badan.

**HABRAACYADA BIILASHA:**

Siyaasadaan waxay dhigaysaa habraacyada biilasha ee Ridgeview iyo tallaabooyinka ay Ridgeview qaadi karto marka masuuliyada bukaanka ee daryeelka caafimaadka aan la bixin.

1. Ridgeview waxay codsan kartaa lacag bixinta lacag kasta oo uu bukaan masuul ka ah lana xariira daryeelka caafimaadka (sida qayb bixinta ama lacagaha la jaro) kahor ama waqtiga daryeelka la bixiyo (marka laga reebo Daryeelka Degdegga ah). Ayadoo la eegaayo Daryeelka Degdega ah, Ridgeview waxay codsan doontaa lacag bixinada la gaarayo ee uu masuul ka yahay bukaan lana xariira daryeel caafimaad kadib marka daryeelka la bixiyo.

2. Haddii bukaanku aanu caymis ku jirin ama caymiskiisa aan la garanayn waqtiga adeegga la bixinaayo, Ridgeview waxa ay heli doontaa Qiimeynta u-qalmitaanka inta lagu jiro is-diiwaangelinta kahor, diiwaangelinta, ama nidaamka is qorista, ama dhibcaha kale ee la xariira nidaamka biilasha iyo uruurinta lacagta, sida ku cad Xeerka Minnesota 144.587 subd.2 .

3. Haddii bukaan uusan lacag siin Ridgeview waqtiga uu helaayo daryeelka caafimaadka, Ridgeview waxay lacagta ku dalici doontaa cida masuulka ah asaga ama ayada kadib marka la helo lacag bixinada Caymiska Qolyo Saddexaad.

4. Haddii bukaanku u qalmo Kaalmada Dhaqaale, Ridgeview waa inay meesha ka saarto haraadi kasta kadib Caymiska Qolyaha Saddexaad bukaankuna uma qalmo inuu bixiyo lacag sida ku xusan Siyaasada Kaalmada Dhaqaalaha.

5. Damaanad qaadayaashu waxay u qalmi karaan lacag dhimis buuxda oo ah 20% oo laga jaraayo lacag haraadiga lacag kasta oo si gaar ah loo bixinaayo oo ka badan $200 marka ay si buuxda u bixinayaan haraaga kadib marka dhammaan dhinacyada saddexaad ee ay khusayso lagu dalaco lacagta, la bixiyo, iyo dhammaan qiimo dhimista lagu dabaqi karo.

6. Haddii bukaanku uusan awoodin inuu lacagta si buuxda u bixiyo, Ridgeview waxay bixisaa labo dookh oo ah qorshooyin lacag bixin oo aan lahayn dulsaar, qorshaha lacag bixinta fudud iyo qorshaha lacag bixinta la balaariyay ee loo maro ClearBalance.

   Qorshaha Lacag bixinta Fudud: Waa qorshe lacag bixin oo lacagta lagu bixinaayo muddo 5 billood gudahood ah. Lacag bixinta ugu yar oo ah $25 bishii.
   Qorshaha Lacag bixinta la Balaariyay: Qorshooyinka lacag bixinta la bixiyo ayadoo loo maraayo shirkad Saddexaad, ClearBalance. ClearBalance waxay bixisaa qorshooyin lacag bixin oo la balaariyay oo dhan illaa 36 billood.

7. Ridgeview waxay bukaanada ku dalici doontaa lacag kasta oo haraadi ah iyadoo adeegsanaysa nidaamkeeda qaansheegadka caadiga ah oo ay ku jiraan ugu yaraan afar (4) xiriir oo ay ku jiraan isku darka xarfaha, wicitaano taleefan (caadi ah iyo/ama ootamaatig ah), iyo bayaan lacageed oo bille ah ugu yaraan 120 maalmo kahor inta aan

loo gudbin hay'ad lacag uruurin oo ka baxsan nidaamka. Ridgeview waa inay ku dartaa macluumaadka ku saabsan sida loo helo nuqulka luuqadda fudud ee kooban ee ka hadlaysa Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Ridgeview iyo Codsiga Daryeelka Bulshada (Samafalka) xog kasta oo xiriir.

**HABRAACYADA LACAG ARUURINTA:**

1. Inta lagu jiro 120 maalmood ee koowaad kadib marka lasoo saaro bayaanka koowaad ee lacagta bukaanka ee la xariira daryeelka, Ridgeview ma u gudbin karto akoonka hay'ad lacag aruurin ama kama qayb qaadan karto ficilada lacag aruurinta aan caadiga ahayn (extraordinary collection actions, ECAs).

2. Ridgeview waa inay ilaaliso dhammaan habraacyada ogeysiinta bukaan socodka ee lagu sheegay Siyaasadda Kaalmada Dhaqaalaha.

3. Haddii jawaab habboon oo bukaan aan la helin kadib 120 maalmood oo laga bilaabaayo bayaanka lacagta ee koowaad, Ridgeview waa inay u aqoonsato lacagta haraadiga ah ee aan la bixin inay lamid tahay deyn xun. Ridgeview waxay sii wadi kartaa dadaalada aruurinta deynteeda xun  ama waxay akoonada deynta xun u gudbin kartaa hay'ad lacag aruurin si ay u sameyso dadaalo lacag aruurin oo dheeraad ah sida uu qabo sharcigaan.

4. In kastoo ay jirto nooc deyn xun ama u gudbinta hay'ad deyn uruurinta, bukaanku waxa laga yaabaa inuu codsado Kaalmo Dhaqaale isagoo isticmaalaya habka lagu qeexay Siyaasadda Kaalmada Dhaqaalaha ee Ridgeview. Hawsha lacag uruurinta waa la joojin doonaa inta codsiga Kaalmada Dhaqaalaha dib loo eegayo.

5. Ridgeview waa inaysan u gudbin akoonka bukaanka hay'ad dayn uruurinta ama qareenka/sharciga daynta ilaa laga xaqiijinaayo:
    - Inay jiraan sabab macquul ah oo uu bukaanka loogu leeyahay daynta iyo inuusan jirin khilaaf ku saabsan eedaha faylka.
    - Dhammaan lacag bixiyaasha kale ee la yaqaan ayaa si sax ah lacagta loogu dalacay, lacag kasta oo haraadi ahna waxaa masuul ka ah bukaanka.   Bukaanka laguma dalici doono lacag kasta oo shirkada caymisku ay waajib ku tahay inay bixiso.
    - Bukaanka waxaa lasoo jeediyay qorshe lacag bixin oo macquul ah.
    - Bukaanka waxaa la siiyay fursad lacag bixin oo macquul ah si uu u codsado Kaalmo Dhaqaale. Marka codsiga Kaalmada Dhaqaale lasoo gudbiyo siyaasad kasta sida ku xusan Siyaasada Dhaqaalaha, hawlaha lacag uruurinta waa la hakin doonaa soddon maalmood iyadoo la oggolaanayo in codsiga la habeeyo oo bukaanka la ogeysiiyo go'aanka.

6. Dhammaan nidaamyada lacag uruurinta waxay u hoggaansami doonaan sharciyada gobolka iyo federaalka iyo siyaasadaha iyo nidaamyada u degsan Ridgeview. Habraacyada lacag aruurinta waxay sidoo kale u hogaansami doonaan Heshiiska Guud Qareenka Minnesota. Wakiilka Ridgeview ama Agaasimaha Adeegga Maaliyada ee Bukaanka ayaa awood u leh inuu oggaado in dadaal macquul ah la sameeyay si loo oggaado in bukaanku u qalmo Kaalmada Dhaqaale sida waafaqsan siyaasadda Caawinta Dhaqaalaha.

    Marka ay jiraan bukaano aan caymiska haysan ama aan la garanayn xaaladdooda caymiska, Ridgeview waa in aanay bilaabin mid ama in ka badan oo ka mid ah falalkaan soo socda ilaa bukaanku aanu u qalmin Daryeelka Bulshada (Samafalka) maahee ama uu diido codsiga Daryeelka Bulshada (Samafalka):
    - Bixinta diiwaangelin ama ka qorista bukaanka qorshaha lacag bixinta.
    - Badelida shuruudaha qorshaha lacag bixinta bukaanka;
    - Siinta bukaanka, deyn ama layn deyn, xogaha codsiga ee la xariira deynta ama laynka deynta, ama caawimaad la xariirta codsashada deyn ama layn deyn, lacag bixinta deynta caafimaadka.
    - Gudbinta deynta bukaanka si lacag loo aruuriyo, oo ay kujiraan lacag aruurinta fudud, lacag aruurinada qolyaha saddexaad, nidaam kasta oo kale oo la xariirta lacag aruurinta deynta;

Aan la Xakameyn

- Diidmada adeegyada daryeelka caafimaadka ee ku aadan bukaanka ama qof kasta oo kale oo kamid ah qoyska sababo la xariira deyn caafimaad oo aan wali la bixin, ayadoon laga eegeyn in adeegyada loo arko kuwo muhiim ah ama kuwo laga heli karo bixiye kale; ama
- Aqbalida kaarka lacag bixinta deynta oo dhan $500 oo lagu bixiyo deynta caafimaadka ee lagu leeyahay isbitaalka.

7. Kadib marka la sameeyo dadaalo kasta oo macquul ah oo lagu oggaanaayo in bukaanku u qalmo Kaalmo Dhaqaale, iyo haddii aan jawaab bukaan oo wanaagsan la helin 120 maalmood kadib bayaanka biilasha ee ugu horreeya, Ridgeview waxa laga yaabaa inay qaado mid ama in ka badan oo ka mid ah tallaabooyinka lacag uruurinta aan caadiga ahayn ee soo socda (ECAs), ilaa xad uu oggolaaday Agaasimaha Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka Ridgeview ama qofka loo xilsaaray.
    - U gudbinta Hay'ada Lacag Uruurinta
    - Rahmad u dhigida hanti shaqsi.
    - Ku xirida ama la wareegida akoontiga bangi shakhsiga ama hanti kale oo shaqsi leeyahay.
    - Sameynta tallaabo xaajood oo ka dhan ah shaqsi.
    - Muujinta mushaar shaqsi.

8. Ridgeview waa inay gasho heshiis qoraal ah oo ay la gelayso hay'ad uun aruurisa lacag oo loola jeedo deyn xun. Heshiisku wuxuu ku waajibin doonaa hay'ad dayn uruurinta inay dhawrto isla habraacyada la xiriira go'aaminta u-qalmitaanka Kaalmada Maaliyadda ee khuseeya Ridgeview sida ku xusan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadeed ee Ridgeview. Heshiisku wuxuu mamnuucayaa gudbinta ama in dhinac saddexaad laga iibiyo deynta xun.

9. Hay'ad lacag aruurinta ee deynta xun loo soo gudbiyo uruurinta lagama yaabo inay gasho wax kasta oo lacag uruurin ah oo aan caadi ahayn iyadoo aan ogolaansho qoraal ah ka haysan Ridgeview.

10. Dhammaan hay'adaha deyn uruurinta ee qandaraaska kula jirta Ridgeview waxay u hoggaansami doonaan xanibaadaha iyo habraaca hawlaha lacag uruurinta sida lagu qeexay Heshiiska Isbitaalka Guud ee Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota. Hay'adaha deyn uruurinta waa inay cabasho kasta oo ay hesho usoo gudbiso Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee Ridgeview bil walba.

11. Agaasimayaasha Gollaha Ridgeview wax dulqaad ah kama muujiyaan xadgudubyada, dhibaataynta, dulmiga, beenta, luuqadda khiyaanada ah/marin habaabinta, ama lacag uruurinta khiyaanada ah/marin habaabinta ah ee ay qabato hay'adda dayn uruurinta oo qandaraaska kula jirta, wakiiladooda, iyo shaqaalaha isbitaalka iyo rugaha caafimaadka ee ka mas'uulka ah aruurinta deynta caafimaadka bukaanka.
    - Dhammaan walaacyada laga keeno bukaanka ama dammaanad qaadayaasha ee ku saabsan hawlaha lacag uruurinta xun waa la diiwaangelin doonaa.
    - Cusboonaysiinta ku saabsan tirada dhacdooyinka ku xadgudbida siyaasada hay'adaan iyo tallaabo kasta oo lagu saxayo waa in loo soo bandhigaa Agaasimayaasha Guddiga wax aan ka yareyn sannad kasta.

**TIXRAACYADA:**



Aan la Xakameyn